# GOLAHA WAKIILADA JSL

## WAAXDA HADAL-QORAALKA IYO GUDIYADA

**Kal-fadhigii 31aad fadhigii 9aad** **04/08/2016**

**Ajendaha: -**Dooda Xeerka ka hortaga Maydhitaanka Lacagaha

**Quraanka: -** Md. Xaamud Cisman Cigaal

**Gudoominayay: -** Md. Dr. Cali Yuusuf

**Gudoomiyaha: -** Sadaqa Allaahu Cadiim, waxaan ku soo dhoweynayaa Mudanayaasha Xeerka ka hortaga Maydhitaanka Lacagaha ka doodaya ee isu qorey.

**Md. C/raxman Maxamed Jaamac (Xoog):- (22Min 06Sec)**Xeerkan Golaha horyaal kumuu jirin ajendihii aynu ansixinay mudanayaal badan ayaa aad uga qeyliyay in laga dodo xeerkan aan ajendaha ku jirin, gudoomiye ku-xigeenku wuxuu ku doodey inuu ajendaha ka soo galayo qodobka ah "wixii dambe ee soo kordha (any other business)", hadaba waxaan halkan ka sheegayaa shirarka ajendaa la dhigtaa, markuu ajendahaasi dhamaado ayaa la yidhaahdaa maxaa kale oo yaaley, marka shir-gudoonka waanu ka yeelay laakiin waxaan cadeynayaa inaan la qabo xildhibaanadaas sheegay in aanu procedure-kii soo marin.

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa ka hortaga meydhitaanka lacagaha anigu waxaan u bixin lahaa **Xeerka Meydhaanka Lacagaha**, ama hadii afkaasi kii geel jiraha yahey oo uu adag yahey**Xeerka ka hortaga lacagaha xaaraanta ah,** waxaan xaaraan uga jeedaa maandooriyayaasha, maandooriyayaashuna waa sida cocaine, heroin iyo wixii la mid ah oo waxa ka soo baxa intay meherad yar u furtaan ayay lacag ka soo saaraan lacagtaas ayaan u jeedaa markay iyadoo liquid ah ay bangiga ku noqoto.

Gudidda dhaqaalaha kuma waafaqsani qodobadan soo socda: -

**Qodobka 15aad**oo odhanaya shirkadaha iyo shakhsiyaadka waxaa waajib ku ah inay u gudbiyaan xogta cid kasta oo looga shakiyo faldambiyeed (criminal crime) lacag maydhis ay ku jirto, waxaan isweydiinayaa goormuu Bangigu noqdey Xeer-ilaaliye, sida sharciga ah faldambiyeed waxaa iska leh Xeer-ilaaliyaha loomana report-gareyn karo cid kale, aynu isweydiino bangiga dhexe ee Somaliland ma waxaa lagu sheegi karaa Bangi mise Bakhaar, dawlada Kulmiye waxay horseeday bangiga oo awalba aan lagu qabin kalsooni ayay intii yareyd ka qaadey oo ay ka dhigtey bakhaar, markaa isagoo sidaa awal u liitey ayuu wasiirkii ugu horeeyay ee dawlada kulmiye intuu lacagtii adkeyd ka qaatey uu meel kale dhigtey, awoodiisiina cid kale ayay ku wareejisey, markaa gudidda dhaqaaluhu ha u soo celiso bangiga dhexe awoodiisii sharci

ahaaneed, gudidda ayaa ku dartey qodobkaas xeerka markaa anigu waxaan soo jeedinayaa sidii hore in loo daayo Qodobkaas.

**Qodobka 18aad** Qodobka waxaan jeedinayaa isna in sidiisii hore ee lagu keenay loo daayo, waayo waa cadaaladaro in muwaadiniinta qaarna loo fasaxo qaarna loo diido inay wadanka kala baxaan lacag 150 milyan oo shilling soamliand, $20,000, waxaana qodobka ku qoran waxaa la bixi karta cidey Wasaarada Maaliyadu u ogolaato oo kaliya, markaa cadaalad maaha arrintaasi iyadoo aynu ognahey cidey u ogolaan karto, markaa qodobkaas oo isna gudiddu sidaa u badashey ha laga daayo oo sidii hore ha loo daayo.

Waxaana isla qodobkaas Gudidda ku raacsanahay inta ay ku soo dareen ee ah "iyo ciddii la soo galeysa" ee aan lagu xakameyn cida la baxaysa oo kaliya waayo awal qodobku wuxuu sheegayay oo kaliya cida la baxaysa, lacagta 150 milyan oo shilling Somaliland ayay ku qoreen ha laga dhigo ama wixii u dhigma ee lacag qalaad ah waayo lacag shilling Somaliland ah oo inta le'eg cidna la soo gali mayso ama la bixi meyso.

Waxaa ku qornaa Xeerka waa inay dawladu la wareegto lacagtaas hadii la sheegan waayo, waxaad moodaa inay gudiddu iska dhiseyso Wasaarada Maaliyada, anigu waxaan ka dhigayaa Khasnada Dawlada ee Bangiga, awalna waxay aheyd dawlada dhexe inay la wareegto, markaa anigu gudidda kuma waafaqsani sidii hore waan ka badalayaa oo waxaan leeyahey bangiga ha lagu celiyo.

**Qodobka 31aad** ee ka hadlaya helida xogta Lacagta Mobilada ku jirta, waa sababta aanu u lahaaa xeerkan magiciisa iyo wuxuu ka hadlayaa isma laha, Gudoomiyaha Bangigu markuu warbixinta ina siinayay wuxuu yidhi dhowr milyan ayaa samada heehaabaya wuxuu u jeeday Zaad, lacagahan been abuurka ah ee uu sharaxayay oo anigu aan sacabka ugu tumay ayay xakameysaa, warkan zaadku lacagtaadii isagaa qalab uu ku eego faalisada meelna wuu ku xafiday oo isagaa dadkii u haya, sidee baa loo odhan karaa lacagta mobileska ku jirta argagixisadu isticmaaleysaa oo loo odhan karaa waa la maydhayaa, maaney in shirkad gaar ah iyo cid gaar ah in loo jeedo arrintaas anigu waan cabaareynayaa with highest level, waxay ilaaliyaan lacagta faalisada ah, anigu waxaan u arkaa badbaado ee uma arko lacag samada heehaabeysaa.

Nuqulkan ina horyaala waxaad moodaa lifaaq lagu sameeyay soo koobid summary sidii heshiiskii DP world ee barigi dhoweyd la inoo keenay, baryahan summary baa ina heysatey oo Xeerku qodobka 15aad ayuu ka bilaabmayaa.

**Qodobka 20aad** wuxuu odhanayaa saraakiisha loo igmaday xilalka ku xusan qodobka 15aad markaa sidee baa lagu ogaanayaa xilalkaas hadaanu qodobkii ku jirin.

**Qodobka 20aad farqada 3aad** oo lagu kordhiyay "cidii ka hortimaada xeerka", ma dhameystirna isna. Waxaan leeyahay war xeerkan ha la kala guro waxba ku tuman maayee.

**Markaa waxaan soo jeedinayaa: -**

- Xeerkani waa mid aad loogu baahan yahey si loo xakameeyo loogana hortagolacagaha ka soo baxa ilaha xaaraanta ah si aan loogu isticmaalin faldambiyeedo abaabulan (organize crimes), iibsashada siyaasiyiinta sida wasiir iyo xildhibaan iyo argagixisada, si aan saddexdaas loogu isticmaalin.
- Sidaa darted, marka xeerka laga saxo ama laga saaro qodobada aan hore u soo taabtey iyadoo aan cid gaar ah ama shirkado gaar ah loo daneynayn ay cod ku ansixiyay xeerkan aan u bixiyay Xeerka ka-hortaga lacagaha xaaraanta ah.

**Md. C/raxman Yuusuf Cartan:-** **(07Min, 01Sec)** Waad mahadsan tahey Gudoomiye, anigu Xeerka si mabdi'iyan ah baan uga hadlayaa (as matter of principle), horta waxaan ku waafaqsanahey Xildhibaanada Xeerku waa mid muhiim laakiin procedure-kii aynu u shaqeyn jirney inuu soo maro weeye, Xeerkan Xeer la mid ah oo ah Xeerka Maydhitaanka Lacagta ayaa Dawlada Federalka Somaliya Baarlamaankeedu ansixiyay bishii December 2015kii oo websitekooda ayaad ka heleysaa cida kuwaa u gudbisey ayaa inaga inoo soo gudbisey, Baarlamaan baynu nahey xeerkani muhiim buu noqon karaa, laakiin waa inuu Xeerku noqdaa mid danaheena huwan oo inagu duruufaheena aynu ku fadhiisino, Xeer maaha inaynu daaqada ka soo galino oo aynu ansixino iyadoo aan la akhrin oo aan la fahmin dee dhaqaaleheena ayuu saameynayaa, nabadgalyadeena ayuu saameynayaa, xidhiidhadeena oo dhan buu saameynayaa.

Markaa hadeynu dooney Xeerkani inuu ansaxo waa inuu marka kowaad soo maro procedure-kii aynu ku shaqeyn jirney, marka labaad waa in loo soo talo badsado, loo qabto kulamo (workshops) oo lagu soo analyse-gareeyo markaa wixii ina anfacaya laga soo saaro, waayo inagu ma nihin dawlad la ictiraafsan yahey dusha waxba la inagama saari karo danaheena inagu inaynu ka fikirno ayaynu u baahanahey danaheena dawlad Somaliland oo aan la ictiraafsanayn danaheena inaga og, waxaan maqlayaa World Bank ayaa Xeerkan wada wuxuu leeyahay macaawinooyinkaan idin siin lahaa ilaa aad Xeerka ansixisaan idin siin maayo, ma xuma laakiin deg-deg iyo qarbo qarbo inaynaan ku ansixin weeye.

Xeerkani waa mid saameyn badan ganacsatadeena, dadkeena qurbaha jooga iyo guud ahaan saameyn badan ku yeelanaya, waxaynaan akhriyin oo aynaan iska eegin dee la inooma soo yeedhin karo inagana masuuliyad baa ina saaran, Xeerkani waa xasaasi u baahan in sidaan sheegay si fiican looga baaran dego ay tahey, yaynaan dhayalkaas iyo fudeydkaas iyo sidan daaqada iminka looga soo galiyay aanu ku socone uu

procedurekii Bangiga soo maraa, waa in aad looga doodaa inagu police fairkii caalamka ma nihine, dee caalamku haduu doonayo inaynu askar u noqono ha ictiraafo dee, Somaliya oo Ictiraaf heysata hadii laga iibiyay iyadoo argagixiso iyo budhcad badeedba jooga hadana waa lagu guneeyay oo lagama doodid sidiisii baa lagu ansixiyay, taas qaadan kari meyno oo askar ma nihin dano dad kale fulinaya, waa inaynu danta dadkeena, kan qurbaha ku maqan iyo kan halkan jooga ee aan la ictiraafsaneyn maaha inaynu sida somaliya yeeleen yeelno.

Waxaynu u baahanahey inaynu Xeerka Masuuliyad iska saarno, waxaynu u baahanay inuu Xeerku soo maro procedure-kii saxda ahaa, waxaynu u baahanahey in Xildhibaanadu danta Somaliland aynu fulino wixii dhib inoo keenaya aynu iskaga tagno, waana khalad in la yidhaahdo sida Somaliya u ansixisey u ansixiya, waa khalad in la yidhaahdo World Bank baa hadeynaan ansixin waxba ina siineyn, waxba yaaney ina siin Somaliland maslaxadeeda inaynu difaacno ayaa loo baahan yahay, wixii dhibta u keenaya dalkeena inaynu iska eegno oo Xeerkan iska eegno ayaa loo baahan ayahey markaa xildhibaano iyo Shir-gudoon iyo xukuumadba xil iska saarno.

**Md. Xamze Maxamed Gaadaweyne: - (03Min, 56Sec)** Bismilaahi Raxmani Raxiim, ana sidoo kale ayaan min xeythu mabd'a aan kaga hadlayaa xeerkan ina horyaal, xeerkani waxa kaliya uu shaqeyn karaan marka ay jiraan baankiskii legal-ka ahaa hadii kale ma shaqeynayo, iminkana waxaad moodaa inaynu ka soo horeysiinay inagoo aan ansixin Xeerkii Bangiyada Ganacsiga.

Arrinta labaad waxa weeye long run mudo marku joogoba hadana wuu isbadalaa oo runtii waxaa ku soo biira waxyaabo kale oo soo galaya long run-ka, intooda ugu badani waa practice taasina runtii waxay inooga baahan tahey ku talogalkeeda iyo aqoonteeda, ilaa iminka lama hayo waa maxay Xeerka lagu ogaan karo ee lagu dabaqi karo Xeerkan anti-laundry-ga hadii aan iminka aan ka soo dego garoonka diyaaradaha oo lacag badan sita intee in le'eg baa la ii ogol yahey oo dawladu dareen ka galeyn inteese la iga shakiyi karaa markaan soo qaato ma markaan 100 soo qaato mise markaan 200 soo qaato oo waa in lagu dabaqaa inta Kenya ama Djabuti laga isticmaalo kama madhnaan karo inaguna taasna in la sheego ayaan rabaa oo la cadeeya inta u baahan in laga shaki karo inay tahey laundry iyo in kale.

Ugu dambeyntii waxaan soo jeedinayaa Xeerkani muhiimad weyn buu leeyahey in lagu deg-dego maaha, in la soo kala horeysiiyo isaga iyo Xeerkii Bangiga Ganacsiga waxaan u arkaa goldaloole, markaa waa in Xeerkan dib loo celiyaa Xiligii uu fuli karo ee macquulka ahna la keeno Golaha, laga soo saaro wixii galdaloolooyin ku jira. Waad-mahadsantihiin.

**Md. Baar Siciid Faarax: - (02Min)** waad mahadsantahay Gudoomiye, Xeerkan horta waxaa inoo soo gudbiyay Bangiga Dhexe meel kastaba Bangiga ha kaga yimaadee, Gudoomiyuhuna wuxuu inoo sheegay Xeerkani inuu yahey mid aad u muhiima, laakiin

waxaan xildhibaanada ku raacsanahey inaanu ka hor iman inaga masaaliixdeena iyo danaheena, waxyaabo ganacsigeena yar yar ee dalku awalba dhibku wuu isaka jiraye ma dooneyno wax sii dhibaateeya xaqiiqdii.

Markaa anigu waxaan qabaa madaama Xeerkan aad loogu baahan yahey oo wax badan inaga xidhan yihiin in Gudidda dhaqaaluhu si fiican u dhex gasho ama Gudi gaar ah oo iyaganu qeyb ka yihiin loo saaro dabadeedna si fiican loo soo akhriyo wixii masaaliixdeena ka hor imanaya laga soo saaro wixii ina anfacaya ee danaheena aan ka hor imaneyna, wakhti baanu u baahan yahey Xeerkani iyadoo dhan kale laga eegayona baahida loo qabo wakhtigaa kooban ha lagu soo akhriyo oo ha laga soo shaqeeyo oo Goluhu ha iska xil saaro oo muhiimadiisa aynu siino Xeerkan.

**Md. Ibraahim Jaamac Cali (Reyte):- (03Min, 21Sec)**Gudoomiye waad mahadsan tahey, aniga waxay ila tahey in xeerkani aanu si procedure-kii xeerarka u waafaqsaneyn, Xeerarka inooga imanaya hay'addaha dawlada waxay leeyihiin hanaan caadiya waxaana khasab ah inuu soo maro golaha wasiirada ka dibna madaxeynuhu inoo soo gudbiyo, markuu inoo yimaadona waxaynu u dhiibnaa gudidda ku shaqada leh taas oo public consultation u qabata dadka xeerku qabanayo ka dibna warbixin tifaftiran gudiddu golaha sidaa ku keento, markaa Gudoomiye waxaan qabaa inaynu u baahanahey Golaha Wasiirada iyo aragtidoodii waxay ka qabaan iyo tan madaxweynaha ka dibna Gudidda Dhaqaalaha u dhiibno si uu ula jaanqaadi karaan Xeerar kakale ee Maaliyada kuwa Golaha yaal iyo kuwii ansaxay iyagu.

## Markaa Gudoomiye: -

- Anigu waxaan ku talinayaa Xeerkan dib aynu ugu celino Golaha Wasiirada oo ha soo maro hanaankii (procedure) caadiga ahaa. Waad mahadsan tihiin.

**Md. Maxamed Xuseen X. Ciise: - (04Min, 16Sec)** ASC, Gudoomiyaha iyo xildhibaanaduba way salaaman yihiin horta, Xeerkan waxaad moodaa marka xildhibaanada hadley la eego in doodii iyo hadalkoodii meel wada marayo sababtuna waxa weeyi xeerkan oo aan procedure kii aan soo marin oo bangiguna soo gudbiyay xukuumadana dhinac uu ka soo maray, markaa taasi waa tan keeneysa in la yidhaahdo procedurekii ha la soo mariyo.

Xeerkan waxaa laga yaabaa inay dabada ka riixayaan qolooyinkan yidhaahda waxaanu la dagaalameynaa argagixisada oo bangigeena dhexe talooyin badan oo world bank uga yimi ay ku soo biiriyeen bay u eeg tahey, xeerkana hore ayaa looga ansixiyay baarlamaanka dawlada ku meel-gaadhka somaliya madaama ay gacanta ku hayaan iyana maamulkooda dawladahan reer galbeedku markaa iyagana sidaasaa looga soo ansixiyay oo loo marsiiyay, gudoomiyaha bangiguna wuu inoo sheegay in reer galbeedka iyo mareykan ayaa dabada ka riixayaan in dunida loo sameeyo.

Money laundry-ga hadaad u fiirsato aduunyada ama idaacadaha dhageysato waxa weeye wax la ilaaliyo oo sidii la doonayo loo dhigo oo reer galbeedku markey doonayaan inay wax sharci daro ah bixiyaan iyagaa sameeya dhibaatooyinka aduunyada ka jirtana siyaabo badan baa loo fund-gareeyaa, markaa sidaan doonayo aan u dhigto ayay leeyihiin, way fiican tahey in la ilaaliyo lacagaha sharci darada ah inaguna markeynu sameynayno xeerarkan oo kale waa inaynu ku base-gareynaa dhaqankeena iyo sharcigeena oo duruufeheena gaarka ah ka eegayna.

Markaa anigu waxaan leeyahey anigoon xildhibaanadii hore ka duwaneyn wuxuu u baahan yahey xeerkan in dib loo eego sababtuna hadaad akhrido xeerkan oo la ansixiyo waxyaabaha uu keenayo ma yihiin waxyaabo dhulkeena ka jira, ma yahey weel dhaq-dhaqaaqeena yar ee ganacsi ee aynu sameysaney ileyn cidina inama aqoonsanee ku haboon, ma laga yaabaa inuu dhibaato u keeno dhaqaaleheena iyo ganacsigeena, markaa sharcigeena iyo dhaqankeena ganacsiga jira iyo dhaqaale aynu u eegno xeerkan, mana haboona in la inagu yidhaahdo dushaa la idinka controlayaa iyadoo la adeegsanayo nidaamkuu keenayo xeerkani.

Markaa si arrimahaas looga taxadaro Xeerkani wuxuu u baahan yahey inaga iyo bulshada rayidka ah iyo shirkadaha lacagaha ka shaqeeya aynu kala tashano oo ra'yigooda helno oo Goluhu intuu gudi u saaro ha ahaato tan dhaqaalaha ama gudi kale dabadeedna xeerkan mar labaad dib loo eego oo uu system-kii caadiga ahaa soo maro.

**Md. Cumar Sanweyne Sixitaan (Point of order):-** waxaan saxayaa marka kowaad Xeerkan sanadkii hore December baa la inoo keenay Golaha Wasiiradana wuu soo maray, marka labaad Xeerka Waxaa Gudiyada loogu dhiibaa ee Golaha ugaga soo warbixin celiyaan waa inay xildhibaanadu fikirkooda ra'yi ahaan ku kordhiyaan iyana ileyn cirka laga keeni maayee, marka saddexaad Xeerka waa loo soo qabtey public consultation meeting oo Bangiga dhexe ayaa u soo qabtey xildhibaanada gudidda dhaqaaluhuna way joogeen hawshaasna iyagaa soo fududeeyay, markaa maaha wax laga soo sameeyay suuqa bacadlaha.

**Md. C/raxman Cisman Caalin:-** **(04Min, 11Sec)**Gudoomiye xeerkani waa mid aad u muhiima isla markaana xasaasiya ah oo sensitive ay ka dhalan karto, anigu dhowr qodob baan eegayaa, tan hore procedureka xeerku golaha ku yimi maaha kii caadiga ah, Gudoomiyuhu wuxuu ku justify-gareeyay other business inuu yahey, other business waxaa la gali karaa marka qodobada asaasiga ah ee ajenduhu inaga dhamaado markaas ayaynu gali kartaa wixii kale ee dheeraada, taasina cudur daar maaha oo ma noqon karo wax lagu cudur daarto, ajende aynu ku shaqeyno ayaynu shaleyto ansixinay waxna kamaynu qaban, waxaa la yidhi warqad uu gudoomiyuhu u qorey ayaa golaha lagu keenay, xeerku markuu golaha yimaado waxa weeye in gudidii

ku shaqada laheyd loo dhiibo, gudiddu consultation meetings u qabato, inay comments ka soo bixiso ka dibna golaha u soo report-gareyso, intaa midna ma heyno, sabab xeerkan dabada looga riixayo anigu garan maayo.

qodobka labaad ee aan doonayo in aan dulmara waaxa weeye xeerar maaliyadeed oo badan baa golaha horyaal hadeynaan sidii iminka loo sheegin aynaan garan xeerka iyo xeerarka sidey u wada shaqeynayaan oo aaney margin noqonin khaladaad badan baynu galeynaa taasna diyaar uma nihin.

Arrinta saddexaad, waxa weeye Bangiyo badan ma lihin oo hal Bangi baynu leenahey kaas oo ah Bangiga Dhexe, uma diyaarsana bangigeenu inay dacwado dhageystaan, inay proceedings sameyaan, inagoo is leh dadka u daneeya hadeynu timaha isugu xidhno waa mid ayaan daro ah.

Anigu waxaan leeyahey Xeerkaasi waa xeer wanaagsan wuxuuna shabahaa xeerkii anti-torotist xeerkaasna waynu ku dhici weynay inaynu sameyno, marka aynu ka xishoono dadkeena, Gudidda dhaqaaluhu waxba way ka qaban waayeen oo wixii bangigu ugu soo sheekeysay bay inoo keentay.

**Markaa waxaan soo jeedinayaa: -**

- Xeerka Gudi gaar ah (Ad hoc Committee) ha loo saaro kulamo dadweyne (public hearing) ha loo qabato sidaana yaynaan ugu sii deyn umada.

**Md. C/kariim Aw Cali Shabeel: - (04Min, 03Sec)** Bismilaahi raxman raxiim, Mudane Gudoomiye Xeerarka Golaha la keeno waxaan ka soo horjeedaa in laga sameeyo propaganda oo la yidhaahdo cid baa dabada ka riixeysa, xildhibaanada way u furan tahey inay ka doodad oo wixii saxa ku daraan wixii khaldana ka saaraan, laakiin maaha in wakhti lagu lumiyo cidbaa keentay oo dabada ka riixeysaa iyo wax la mida.

Anigu waxaan qabaa Xeerkii Bangiga dhexe ama Xeerarkii Bangiyada ee aynu ansixinay inay wax ka dhiman yihiin oo ay qabyo yihiin, cidii ku shaqeyn laheydna la iswaafajiyo oo ay wax badani ka dhiman yihiin markaa xeerarkoodii aynu dib u eegno, Xeerkana cid walba waa ku shaqeysaa si lacagaha loo kantaroolo, amnigii aduunka oo dhana wuu xumaadey marka lacagaha soo galaya waa loo baahan yahay in la kantaroolo, waana arrin aad iyo aad u muhiima inaynu ku shaqeyno, xildhibaanaduna kumay daalin inay soo akhriyaan oo soo qodobeystaan si ay uga doodaan markaa sidaa in la sameeyo ayaan soo jeedinayaa.

Gudidii soo diyaarisey ee ka soo shaqeysay waan u mahadnaqayaa mana fiicna in cid walba shaqadeeda la deedafeeyo, xeerkan sidaa Gudoomiyaha Gudiddu sheegay workshop waa loo soo qabtey, xukuumada wuu soo marey oo iyadaa inoo soo

gudbisey, inta badan sideynu ka warqabno wasiiradu kama doodaan laakiin taas shaqadeeda inagaa u xilsaaran oo leh, way inoo furan tahey marka doodu dhamaato in Gudiddii dhaqaalaha iyo gudi kale oo lagu lamaaneeyay in loo saaro oo wakhti badan aan lagu lumine wakhti kooban wixii ka dhiman lagu soo ururiyo, laakiin xildhibaanadu dhaleeceynta iyo durida ha ka daayaan. Waad mahadsan tihiin.

**Gudoomiyaha: -** Xildhibaanada ka doodey aad bay u mahadsanyihiin, waxaan ka xumahey inaanay xildhibaanadu aaney soo wada akhriyin, Xildhibaan C/raxman Xoog uun baa akhriyay, madaama uu soo marey hanaankii (procedure) caadiga ahaa kulamo consultations ahna loo soo qabtey arrintu inagay inoo taal inaynu dhameystirno, waxaynu u saareynaa Gudi gaar ah (Ad hoc committee) waa inoo fadhiga xiga iyo bacdal ciidka, fadhiguna sidaasuu inoogu xidhan yahey.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha Waaxda Hadal-qoraalka iyo Gudiyada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada** |
| ______________________________ | ______________________________ |